

HUMAN RIGHTS WATCH

# MAXKAMADO “AWOOD BUUXDA LEH”

## Tacaddiyo ka dhan ah Maxkamadeyn Caddaalad ah oo ay Sameyso Maxkamadda Militariga ee Soomaaliya

HUMAN RIGHTS WATCH

# Maxkamado "Awood buuxda leh"

## Tacaddiyo ka dhan ah Maxkamadeyn Caddaalad ah oo ay Sameyso Maxkamadda Militariga ee Soomaaliya

Copyright © 2014 Human Rights Watch
All rights reserved.
Printed in the United States of America
Cover design by Rafael Jimenez

Human Rights Watch defends the rights of people worldwide. We scrupulously investigate abuses, expose the facts widely, and pressure those with power to respect rights and secure justice. Human Rights Watch is an independent, international organization that works as part of a vibrant movement to uphold human dignity and advance the cause of human rights for all.

Human Rights Watch is an international organization with staff in more than 40 countries, and offices in Amsterdam, Beirut, Berlin, Brussels, Chicago, Geneva, Goma, Johannesburg, London, Los Angeles, Moscow, Nairobi, New York, Paris, San Francisco, Sydney, Tokyo, Toronto, Tunis, Washington DC, and Zurich.

For more information, please visit our website: http://www.hrw.org

# Maxkamado “Awood buuxda leh”

## Tacaddiyo ka dhan ah Maxkamadeyn Caddaalad ah oo ay Sameyso Maxkamadda Militariga ee Soomaaliya

**Soo Koobid** ........................................................ 1

**Talooyin** ........................................................ 5

Ku Socoto Madaxweynaha ........................................................ 5

Ku Socoto Baarlamaanka Soomaaliya ........................................................ 5

Ku Socoto Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ........................................................ 6

Ku Socoto Wasiirka Caddaalada ........................................................ 6

Ku Socoto Gudoomiyaha Maxkamadda Militariga ........................................................ 7

Ku Socoto Wasiirada Amniga iyo Arrimaha Gudaha ........................................................ 7

Ku Socoto Wasiirka Gaashaandhigga ........................................................ 7

Ku Socoto Xeer-ilaaliyayaasha Militariga ah iyo Garsoorayaasha ........................................................ 7

Ku Socoto Deeqbixiyayaasha Caalamiga ah iyo Hay’adaha Ku Hawlan Waaxaha Caddaalada iyo Amniga ........................................................ 8

Howlgalka Qaramada Midoobay ee Caawinta Soomaaliya ee (UNSOM) Waaxda Sharciga iyo Xuquuqul Insaanka ........................................................ 8

# Soo Koobid

> Nimankan jooga maxkamadaha militariga wax ay la tahay inay awood buuxda leeyihiin, ma la hadli kartid, waxba ma weydiin kartid, mana ay ixtiraamaan xuquuqul insaanka.
> —Sidaa waxaa wareysi taleefan lagu qaaday ku sheegay bishii October 2013-kii qareen difaac ah.

Tan iyo sanadkii 2011-ka, dowladda Soomaaliya waxa ay si weyn ugu tiirsaneyd maxkamadda militariga ee ciidammada qalabka sida, si ay u maxkamadeyso dambiyo badan oo kala duwan iyo weliba eedaysanayaal. Marka laga soo tago askarta militariga ah, maxkamaddu waxa ay sidoo kale maxkamadeysay xubnaha lagu eedeeyay inay ka mid yihiin ururka hubeeysan ee Islaamiga ah ee Al-Shabaab, ciidammada booliska, xubnaha sirdoonka iyo dadka caadiga ah. Boqolaal eedaysanayaal ah ayaa lagu maxkamadeeyay gudaha caasimadda Muqdisho, iyo magaalooyinka kale ee ku yaal gobollada bartamaha iyo koofurta Soomaaliya, magaalooyinkaas oo sida caadiga ah ay dowladdu ka taliso. Maxkamadda militariga ah waxay buuxisay meeshii ay banaysay maxkamaddii madaniga ahayd oo si wanaagsan u shaqeyn weyday. Maxkamaddu waxay u shaqeysay sida maxkamad sare oo go'aamadeeda aan wax dib u eegid garsoor ah lagu sameyn karin, waxayna sameysay dhageysi dacwado oo si weyn uga hooseeya heerarka caalamiga ah ee maxkamadeynta caddaalada ah.

Maxkamadda militariga, waxaa ka howlgala askar militari oo weli ka tirsan ciidammada qalabka sida, taasina ma ay gaarsiisna shuruudaha aasaasiga ah ee sharciga caalamiga ah ee ah inay noqoto maxkamad karti leh, madax bannaan oo weliba dhexdexaad ah. Maxkamadeynta ayaa ku tacaddisay xuquuqda aasaasiga ah ee eedaysanayaasha ee maxkamadeynta caddaalada ah oo ah inay helaan qareen ay iyaga doortaan, inay diyaarsadaan oo ay soo bandhigaan difaac, inay helaan dhageysi maxkamadeed oo dadweynaha u furan, in aanay iyaga dacwad isku oogin iyo inay racfaan u qaataan maxkamad sare kaddib markii la xukumo. In ka badan tobaneeyo qof oo xukun lagu riday sanadii la soo dhaafay ayaa waxaa lagu xukumay dil waana la dilay, taas ayaana sii ballaarinayso dhibaatada ka dhanka ah xuquuqda aasaasiga ah.

Warbixintan ayaa ku salaysan 30 wareysi oo lagu soo qabtay gudaha Soomaaliya iyo Kenya intii u dhaxeysay bishii Abriil 2013-ka iyo bishii Maarso 2014-ka, waxaana lala yeeshay eedaysaneyaal iyo qaraabadooda, iyo weliba saraakiil ka tirsan maxkamadda militariga, qareeno iyo khubaro xagga sharciga ah. Warbixintu waxay wax ka qoreysaa tacaddiyo kala duwan oo ka dhan ah xuquuqul insaanka oo u baahan in dowladda Soomaaliya iyo deeq bixiyayaasha caalamiga ah ay fiiro gaar ah oo degdeg ah u yeeshaan, taasoo kamid noqonaysa dadaalada laga wado Soomaaliya ee lagu sameynayo isbedalka dhinaca garsoorka ah.

Iyadoo deeqbixiyayaasha caalamiga ah ay ahmiyad siiyeen waaxda caddaalada ee dambiyada ee Soomaaliya, ayaanan weli maxkamadda militariga la siin ahmiyad iyo u fiirsasho. Marka la eego awoodaha ballaaaran ee maxkamadda militariga, gaar ahaan sheegashadeeda inay awood u leedahay inay dhageysato dacawdaha dadka rayidka ah ayaa ah ku tacaddi xuquuqul insaanka caalamiga ah, waxaana si degdeg ah loogu baahan yahay isbedello wax ku'ool ah si loo xaqiijiyo in dhammaan dadka ku eedaysan dambiyada ay helaan maxkamadeyn caddaalad ah.

Bishii Agoosto ee sanadkii 2011-ka, kaddib dagaal xooggan oo ka dhacay caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho, iyo kaddib markii kooxda Islaamiga ah ee Al-Shabaab, ay ka baxday gudaha caasimadda, ayaa madaxweynihii hore ee dowladdii ku meelgaarka aheyd Sheekh Shariif Sheekh Axmed, waxaa uu xukun degdeg ah ku soo rogay goobaha magaalada Muqdisho ee ay Al-Shabaab ka baxeen. Degreetadaas madaxweynaha ayaa siisay maxkamadda militariga awood ay ku dhageysan karto dhammaan dambiyada lagu galo goobahaas—taasi ayaa siisay maxkamada militariga in xitaa ay dhageysan karto dambiyada ay galaan dadka rayidka ah. Inkastoo xukunkaasi degdega ah uu dhacay saddex bilood kaddib, haddana maxkamadda militariga waxay sii waday dhageysiga dacawado ka dhan ah eedaysanayaasha kala duwan oo ka baxsan kuwa ku xusan Xeerka Hab Ciqaabeedka Militariga.

Mas'uuliyiinta Soomaaliya iyo kuwa maxakamadda militariga ah waxa ay difaaceen awoodda ay maxkamaddu u leedahay dhageysiga dacwadahaas, gaar ahaan kiisaska lala xiriiriyo Al-Shabaab iyagoo u sababeynaya in maxkamadaha madaniga ah aanay laheyn ilaalo ku filan oo ay baylah u yihiin in la weeraro marka la eego xaaladda adag ee dhanka ammaanka ah ee wadanka ka jirta. Maxkamadda militariga waxay sidoo kale dhageeysatay kiisas dhaqan ahaan ku adkaa maxkamadaha madaniga, sida dacwadeynta

askar boolis ah iyo kuwa hay'adaha sirdoonka. Hasayeeshee, inkastoo walaaca ka jira xagga amniga iyo kuwa soo wajaha maxkamadaha madaniga ah iyo saraakiisheedaba ay dhab tahay, haddana tani cudur daar ugama dhigi karaan in lagu tacaddiyo xuquuqda ay leeyihiin eedaysanayaasha, ee ah inay helaan maxkamadeyn caddaalad ah.

Inta badan eedaysanayaasha la hor keenay maxkamadda militariga ayaa lagu soo qabqabtay hawlgallo ballaaran oo dhanka ammaanka ah oo ay fuliyaan hay'adda sirdoonka, iyo mida Amniga Qaranka Soomaaliya ee loo soo gaabiyo (NISA). NISA ayaa mar maxaabiis heysay muddo dheer iyagoo wax garsoor ah aan helin. Ma cadda in NISA ay leedahay awood sharciyeed oo ay ku sameyn karto hawlgallo sharci fulin ah.

Tan iyo sandii 2011-ka, garsoorayaasha maxkamadda militariga waxay sameeyeen dadaallo ay ku xaqiijinayaan in eedaysanayaasha ay heli karaan qareeno udooda, oo ay kamid tahay meelaha fogfog oo maxkamaddu ay qaabka wareega ah ay ku tagto. Si kastaba ha ahaatee, sidii ka dhacday magaalada Baydhabo bishii Luuliyo ee sanadkii 2013-ka, kaddib markii dhowr maalmood dad badan lagu maxkamadeeyay magaalada, eedaysanayaasha ayaa fursado kooban oo kaliya u helay inay ku arkaan hal qareen oo matalayay tobaneeyo eedaysanayaal ah, wuxuuna awood u heli waayay in uu qof iyaga kamid ah uu difaac ku filan u sameeyo. Saameynta ay leedahay maxkamadda sare ee la sameeyay sanadkii 2012-ka weli ma kala cadda.

Dhammaan dowladda Soomaaliya iyo taageeraheeda caalamiga ah oo horay u ballan qaaday inay ka go'an tahay taageerada iyo dib u dhiska hannaanka caddaalada ee dalka waa inay ahmiyad siiyaan tacaddiga xuquuqul insaanka ee ay sameynayso maxkamadda militariga. Dhamaadkii sanadkii 2012-ka, wax yar un kaddib markii Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud uu xilka qabtay, ayaa waxa uu mudnaan kadhigay isbedel lagu sameeyo garsoorka. Bulshada caalamka ayaa ka jawaab bixisay arrintaa oo waxay ajandahooda ku dareen garsoorka, oo uu kamid yahay Heshiiska Cusub ee Soomaaliya oo la doonayo in lagu sameeyo qaab horumarineed oo lagu maamulo sidii loo caawin lahaa Soomaaliya saddexda sano ee soo socota.

Hagaajinta hannaanka caddaalada ee Soomaaliya waqti ayuu qaadanayaa, hasayeeshee tallaabooyin wax ku ool ah ayaa hadda la qaadi karaa. Madaxweyne Xasan waa inuu ku amraa Wasaaradda Caddaalada oo kaashanaysa Wasaaradda Gaashaandhigga in laga wareejiyo kiisaska eedaysanayaasha rayidka ah maxkamadda militariga oo loo wareejiyo

maxkamadaha madaniga ah, sidoo kalena baarlamaanka waa inuu dajiyaa xeerar qeexaya arrinkaa. Madaxweynaha waa inuu hakiyaa xukunka dilka ah inta gebi ahaanba laga mamnuucayo. Iyadoo la waafajinayo dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya, baarlamaanka waa inuu dejiyaa xeer xaqiijinaya in askarta militariga ah ee lagu soo eedeeyo inay wax yeelo u geystaan rayidka in lagu maxkamadeeeyo maxkamadaha madaniga ah. Waana in uu baarlamaanka dejiyaa xeerar caawin doona in la ilaaliyo xuquuqda eedaysanayaasha markii la horkeeno dhamaan maxkamadaha, gaar ahaan sharci taageeraya helitaanka gargaar sharciyeed iyo sharci ku aaddan amniga qaranka oo tixgalinaya xuquuqaha. Tallaabooyinkan waxay u baahan yihiin in ay garab socdaan dadaalalo taageero ah oo ay deeqbixiyayaashu sameynayaan si loo xoojiyo baaxadda, islaxisaabtanka iyo amniga maxkamadaha madaniga ah. Waa in la bixiyo tababarro haboon oo la siinayo dhammaan garsoorayaasha, xeer ilaaliyayaasha iyo qareenada difaaca, waana in mudnaanta lasiiyaa in la xaqiijiyo in muwaadiniintu ay helaan caawinaad xagga sharciga ah.

Dib u dhiska Soomaaliya waa shaqo dheer oo adag. Hannaan garsoor oo dhinaca dambiyada ah oo si wanaagsan u shaqeeya ayaa wuxuu lagama maarmaan u yahay in uu caawiyo xuquuqul insaanka dadka Soomaaliyeed. Go’aano hada la sameeyo ayaa waxay u badan tahay in ay saameyn weyn ku yeeshaan muddo dheer oo mustaqbalka ah.

# Talooyin

## Ku Socoto Madaxweynaha

- U wareeji kiisaka dadka rayidka ah ee haatan lagu maxkamadeynayo maxakamadaha militariga nidaamka caddaalada ee dambiyada rayidka lagu qaado;
- Amar ku sii xeer-ilaaliyaha guud ee maxkamadda militariga in kiisaska ka dhanka ah dadka rayidka ah oo hoos imaada xukunka maxkamadda militariga ee mustaqbalka uu ku wareejiyo xeer-ilaaliyaha guud ee maxkamadaha madaniga ah si uu u dacweeyo;
- Si degdeg ah u jooji xukunnada dilka ah ee aan weli la fulin si ay u noqoto tallaabadii koowaad ee lagu joojin lahaa xukunka dilka ah; baarlamaankana ku boori in ay mamnuucaan gebi ahaanba isticmaalka xukunka dilka ah;
- Si firfircoon u taageer isbadel dhinca sharci dejinta ah oo la xiriira helidda taageero sharciyeed iyo dowrka hay'adaha aminga, sida hoos lagu sharxay

## Ku Socoto Baarlamaanka Soomaaliya

- Si degdeg ah u dejiya sharci qeexaya in dib u eegid lagu sameeyo xukunnada ay rido maxkamadda sare ee militariga oo weliba mamnuucaya in dad rayid ah lagu maxkamadeeyo maxkamadaha militariga;
- Si waafaqsan dastuurka ku meel gaarka ah ee soomaaliya, dejiya xeerar xaqiijinaya in askarta lagu soo eedeeyo inay ku tacaddiyeen xuquuqda dadka rayidka ah la horkeeno maxkamad madani ah;
- Sida ku xusan dastuurka ku meel gaarka ah, dejiya xeer ah helitaanka taageero sharciyeed, si loo sameeyo nidaam dhanka taageerada sharciga ah oo siinaya eedaysanayaasha aan awoodin inay qareen qabsadaan fursad ah in ay helaan taageero sharciyeed oo bilaash ah oo weliba xaqiijinaya in taageerada sharciyeed laga heli karo waddanka oo dhan;
- Dajiya xeer ku aaddan amniga qaranka oo tixgaliya xuquuqaha, sida ku xusan dastuurka kumeel gaarka ah, oo qeexaya dowrarka kala duwan ee hay'adaha ammaanka qaranka oo weliba caddeynaya in Sirdoonka Qaranka iyo Hay'adda amniga aanay awood u laheyn inay wax xiraan ama ay xabsi galiyaan;

- Waa inaad ka fakartaan in aad dejisaan xeerar ku xaddidaya maxkamadaha militariga in ay dhageystaan oo kaliya ashtakooyinka la xiraara dambiyada ay galaan xubnaha militariga oo qaabka militariga leh.

## Ku Socoto Gudoomiyaha Maxkamadda Sare

- Waa inaad sameysaa dhammaan tallaabooyinka muhiimka u ah in la xaqiijiyo in garsoorka uu awood u helo inuu sameeyo maxkamadeyn madax banaan, oo dhexdhexaad ah oo karti leh si waafaqsan heerarka caalamiga ah;
- Waa inaad ku amartaa garsoorayaasha in dhammaan dadka maxaabiista ah ay heli karaan maxkamad si ay u ogaadaan sharcinimada xirnaanshahooda.

## Ku Socoto Wasiirka Caddaalada

- Waa inaad tababarro ku haboon siisaa shaqaalaha maxkamadda madaniga ah, oo ay kamid yihiin garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha, iyo kuwa ku saabsan xeerka hab ciqaabeedka dambiyada ee Soomaaliya iyo heerarka xuquuqul insaanka caalamiga ah ee ku aadan maxkamadeynta caddaalada ah;
- Waa inaad ka caawisaa wasiirka gaashaandhigga inuu tababarro ku haboon siiyo shaqaalaha maxkamadda militariga, oo ay kamid yihiin garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha, iyo kuwa ku saabsan xeerka hab ciqaabeedka dambiyada ee Soomaaliya iyo heerarka xuquuqul insaanka caalamiga ah ee ku aadan maxkamadeynta caddaalada ah;
- Waa inaad xaqiijisaa, adigoo taageero ka helaya hay'adaha kale ee dowladda ee ay khusayso, in maxkamadaha madaniga ah iyo shaqaalaheeda la siiyo ilaalo ammaan oo ku filan;
- Waa inaad dadajisaa dejinta xeer ah helitaanka taageero sharciyeed, sida ku xusan dastuurka ku meel gaarka ah si loo sameeyo nidaam dhanka taageerada sharciga ah oo siinaya eedaysanayaasha aan awoodin inay qareen qabsadaan fursad ah in ay helaan taageero sharciyeed oo bilaasha ah oo weliba xaqiijinaysa in taageerada sharciyeed laga heli karo waddanka oo dhan

## Ku Socoto Gudoomiyaha Maxkamadda Militariga

- Ku amar garsoorayaasha militariga ah in ay meel mariyaan sharciyada Soomaaliya, oo sharciga Islaamka uu ka mid yahay, si waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee ku aadan maxkamadeynta caddalada ah;
- Waa inaad ku amartaa garsoorayaasha militariga ah in dhammaan dadka maxaabiista ah ay heli karaan maxkamad si ay u ogaadaan sharcinimada xirnaanshahooda.

## Ku Socoto Wasiirada Amniga iyo Arrimaha Gudaha

- Waa in aad xaqiijisaan in shaqaalaha NISA aanay qof xiri karin ama ay xabsi geynin, in ay haystaan sharci gaar ah oo u ogolaanaya mooyaanee;
- U soo gudbi xeer-ilaaliyaha guud magacyada iyo macluumaadka dhammaan dadka xabsiyada ku jira, oo ay ka mid yihiin maxaabiista ay NISA hasyo;
- Waa inaad dadajisaan dejinta xeer ku aadan amniga qaranka oo tixgaliya xuquuqaha, sida ku xusan dastuurka kumeel gaarka ah, oo qeexaya dowrarka kala duwan ee hay'adaha ammaanka qaranka oo weliba caddeynaya awoodda sharciyeed ee NISA ee ku aadan xiritaanka iyo xabsi geynta;
- Waa inaad xaqiijisaan, adinkoo taageero ka helaya hay'adaha kale ee dowladda ee ay khusayso, in maxkamadaha madaniga ah iyo shaqaalahooda la siiyo ilaalo ammaan oo ku filan;
- Waa inaad xaqiijisaan in dhammaan dadka maxaabiista ah ay heli karaan maxkamad si ay u ogaadaan sharcinimada xirnaanshahooda.

## Ku Socoto Wasiirka Gaashaandhigga

- Ku amar xeer-ilaaliyayaasha militariga inay kiisaska dadka rayidka ah ku wareejiyaan xeer-ilaliyayaasha nidaamka caddaalada ee dambiyada rayidka;
- Xaqiiji in saraakiisha militariga ay si buuxda ula shaqeeyaan xeer-ilaaliyayaasha rayidka ah marka ay dambi baarista sameynayaan.

## Ku Socoto Xeer-ilaaliyayaasha Militariga ah iyo Garsoorayaasha

- Waa inaad xaqiijisaan in dhammaan dadka xiran ay si degdeg ah u gaari karaan maxkamad ay uga doodi karaan sharcinimada xirnaanshahooda;

- Waa inaad xaqiijisaan in qareenada difaaca la siiyo awood buuxda oo ay kula kulmi karaan macaamiishooda, oo ay ku heli karaan dhammaan xogta lagama maarmaanka ah oo dhan iyo faylasha, iyo waqti ku filan oo ay difaac ku diyaarsadaan;
- Ogalaada in si madax banaan loola socodo dacwadaha maxkamadda militariga idinkoo u ogalaanaya kormeerayaal madax banaan ee xuquuqul insaanka inay gali karaan maxkamadaha. Sidoo kale, waa inaad xaqiijisaan in dadweynuha si ballaaran loogu furo dhageysiga maxkamadda, waa haddii amingu uu saamaxayo.

## Ku Socoto Deeqbixiyayaasha Caalamiga ah iyo Hay'adaha Ku Hawlan Waaxaha Caddaalada iyo Amniga

- Waa inaad si cad u taageertaan tallaabooyinka kor lagu sharxay si loo soo afjaro in dadka rayidka ah lagu maxkamadeeyo maxkamadaha militariga;
- Ugu baaqa madaxweynaha Soomaaliya inuu si degdeg ah uu ujoojiyo xukunka dilka ah iyo inaad baarlamaanka ku boorisaan inay mamnuucaan oo ay hakiyaan xukunnada dilka ah;
- Waa inaad taageertaan dadaallo lagu xaqiijinayo in maxkamadaha militariga ay u dhaqmaan si waafaaqsan heerarka caalamiga ah ee maxkamadeynta caddaalada ah;
- Waa inaad taageertaan dadaallo lagu tababarayo qareenada difaaca iyo sameynta barnaamijyo siinaya qareeno muwaadiniinta lagu eedeeyay dambiyada;
- Waa inaad dhiirigalisaan sameynta sharci qaran oo ogalaanaya in go'aamada maxkamadaha militariga ay dib u'eegid ku sameyn karaan maxkamadaha madaniga ah.

## Howlgalka Qaramada Midoobay ee Caawinta Soomaaliya ee (UNSOM) Waaxda Sharciga iyo Xuquuqul Insaanka

- Dhageysiga maxkamadaha militariga ku sameeya la socod joogta ah iyo la socod aad ku sameysaan goobaha dadka lagu xiro, oo ay kamid tahay xeryaha ay NISA maamusho.

# MAXKAMADO "AWOOD BUUXDA LEH"

## Tacaddiyo ka dhan ah Maxkamadeyn Caddaalad ah oo ay Sameyso Maxkamadda Militariga ee Soomaaliya

Dowladda dhexe ee Soomaaliya iyo taageeraheeda caalamiga ah ayaa sheegay inay ka go'an tahay dib u dhiska hannaanka caddaalada ee dalka ay colaaddu burburisay labaatankii sano ee la soo dhaafay. Dowladdu waxay haatan si weyn ugu tiirsan tahay maxkamadda militariga ee ciidammada qalabka sida si ay u dhagaysato dacwado ka dhan ah dambiyo badan una maxkamadeyso eedaysanayaal badan oo ay ka mid yihiin xubnaha ururka hubeeysan ee Al-Shabaab. Boqolaal eedaysanayaal ah ayaa lagu maxkamadeeyay maxkamadaha militariga oo buuxiyay meeshii ay baneeyeen maxkamadihii madaniga oo si wanaagsan u shaqeyn la'.

Warbixintan, *Maxkamado "Awood buuxda leh": Tacaddiyo ka dhan ah Maxkamadeyn Caddaalad ah oo ay Sameyso Maxkamadda Militariga ee Soomaaliya*, ayaa waxay tilmaamaysaa sida joogtada ah ee maxkamadaha militariga ee Soomaaliya ay ugu tacaddiyaan xuquuqda eedaysanayaasha ee ah maxkamadeynta caddaalada ah. Warbixintan ku salaysan 30-ka wareysi oo lala yeeshay eedaysaneyaal iyo qaraabadooda, iyo weliba saraakiil ka tirsan maxkamadda militariga, qareeno iyo khubaro xagga sharciga ah, ayaa waxay tilmaamaysaa sida maxkamaddu ay u xaddido xuquuqda eedaysanayaasha ee ah inay diyaarsadaan oo ay soo bandhigaan difaac, inay helaan dhageysi maxkamadeed oo dadweynaha u furan, in aanay iyaga dacwad isku oogin iyo inay racfaan u qaataan maxkamad sare kaddib markii la xukumo. In ka badan tobaneeyo qof oo xukun lagu riday sanadii la soo dhaafay ayaa waxaa lagu xukumay dil waana la dilay, taas ayaana sii weyneyneysa dhibaatada ka dhanka ah xuquuqda aasaasiga ah.

Human Rights Watch waxay ugu baaqaysaa madaxweynaha soomaaliya inuu si degdeg ah u joojiyo xukunka dilka ah iyo inuu horumariyo tallaabooyin ku xaddidaya dowrka maxkamadaha militariga inay maxkamadeeyaan eedaysanayaasha militariga ah oo kaliya. Dowladda iyo deeqbixiyayaasha waa inay xoojiyaan awooda, islaxisaabtanka iyo amniga maxkamadaha madaniga ah, oo ay taageeraan tababarro la siiyo dhammaan garsoorayaasha, xeer ilaaliyayaasha iyo qareenada difaaca. Ugu dambeyn, baarlamaanka Soomaaliya waa inuu dajiyaa xeerar caawinaya ilaalinta xuquuqda eedaysanayaasha markii la hor keeno dhammaan maxkamadaha, gaar ahaan sharci ah helitaanka gargaar sharciyeed iyo sharci ku aaddan amniga qaranka oo tixgalinaya xuquuqaha.



*Maxaabiis ku jirta Xabsiga Dhexe ee magaalada Muqdisho ayaa eegaya askari militari ah oo hormaraya qolka ay ku xirnaayeen bishii Diseembar ee sandkii 2013-ka. Inta badan dhageysiga dacwadaha maxkamadda ayaa ka dhaca gudaha xabsiga, taasina waxay xaddidaysaa in qaraabada iyo kormeerayaasha ay dhegeystaan dacwooyinka.*

*© Tobin Jones*

hrw.org